

Masuulka qofka loo dooro & Maamulka Hantida qofka

Liiska waxyaabaha la iskaga baahan
yahay adeeg joojinta

1. DIYAAR NOQO

Qorshaha kala hadal qofka loo doorayo masuulka: *Maxay rajeynayaan inuu ka duwanaa doono/ka wanaagsanaa doono masuul/maamule hanti la'aantood? Maxay ka walwalsan yihiin?*

Ku casuun dadka kale ee ku jira shabakadda taageerada qofka, sida xubnaha qoyska, shaqaalaha adeegyada bulshada, shaqaalaha daryeelka tooska ah, ama dhakhaatiirta, inay aragtidooda ka dhiibtaan nooca taageero ee qofku u baahan karo.

Tixgeli inaad isticmaasho qalab ay ka mid tahay [Hagaha Fikir-Wadaagga ee Go'aan-Qaadashada La Taageero](#) si aad ugala hadasho qofka dhinacyada uu doonayo in laga taageero ama meelaha uu taageeradu ka sii socon doono marka masuulka la doortay/maamulaha hantida la joojiyo ama wax laga beddelo.

Dib u eeg dukumentiyada ama aaladaha taas oo loo isticmaali karo in lagu taageero go'aan qaadashada kadib marka masuulka la doortay uu dhamaado, sida:

- Tilmaamaha Daryeelka Caafimaadka
- Wakiil Sharci
- Oggolaanshaha Bixinta Macluumaadka
- Heshiiska Go'aan Gaaris Qofka Laga Caawinayo
- Wakiil Idman (DHS/MA/Kaalmo)

Dib u eeg dukumentiyada ama aaladaha taas oo loo isticmaali karo in lagu taageero go'aan qaadashada kadib marka masuulka la doortay uu dhamaado, sida:

- Wakiil Sharci
- Wakiil maamula bixinta Lacaha Sooshiyaal Sekiyuuritiga
- Qalabka bangiyada
- Akoonka ABLE, Hab maamulka Lacaga Baahiyaha Gaarka ah (Special Needs Trust), ama qalab kale oo maaliyadeed
- Caawimo aan rasmi ahayn oo lagu kala habeeyo dukumentiyada laguna go'aamiyo kharashaadka mudnaanta leh.

2. CODSI DACWAD

Doorro inaad la shaqeyso qareen ama aad fayl gareyso dukumentiyada codsiga adiga oo aan haysan qareen (tan waxaa loo yaqanaa “pro se”). **OGSOONOOW:** Shaqsiyaada loo dooranayo Masuulka ama Maamulka Hantida waxay xaq u leeyihiin inuu matalo qareen marka ay codsi u dirsanaayan maxkamadda.

Inkasta oo aanu sharcigu qasab ka dhigin, haddana waxaa faa'iido yeelan karta in la soo ururiyo qoraallo taageeraya joojinta, kuwaas oo ay bixiyaan xirfadlayaal, sida warqad uu dhakhtar ku taageerayo joojinta, ama warqad ka timaadda xirfadlayaal kale oo qofka si fican u yaqaan.

Masuulka qofka loo dooro & Maamulka Hantida qofka

Liiska waxyaabaha la iskaga baahan yahay adeeg joojinta

Ku dhiirigeli qofka inuu si gaar ah u sheego waxa uu rabo. Waa inay muujiyaan waxay doorbidaan marka ay la hadlayaan booqdaha maxkamadda iyo qareenkooda laakiin waxay u baahan karaan caawimo ku saabsan u doodista naftooda.

Isku diyaari dhageysiga maxkamadda. Waxaad u baahan doontaa inaad sharaxdo sababta aan mar dambe loogu baahnayn masuulka loo doortay/maamulka hantida, isla markaana aad muujiso taageerooyinka kale ee qofku hadda haysto iyo qorshayaasha la hirgelin doono marka la soo afjaro masuulka loo doortay/maamulka hantida. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad sharaxdo waxa ka duwan nolosha qofka hadda marka loo eego markii ugu horreysay ee la aasaasay mas'uuliyadda/maamulka hantida.

3. WAX KA BEDDELKA/JOOJINTA KADIB

Dukumentiyada dhammaystiran oo laga yaabo inay ku jiraan:

- Tilmaamaha Daryeelka Caafimaadka
- Foomamka Shaacinta Macluumaadka ee bixiyayaasha daryeelka caafimaadka, adeegyada bulshada, iyo dugsiga
- Heshiiska Go'aan Gaaris Qofka Laga Caawinayo
- Wakiil Sharci

Nuqullo ka mid ah dukumentiyadan sii dadka ama ururada khuseeya iyo kuwa loo magacaabay ama lagu sheegay dukumentiyada.

U sheeg adeeg bixiyayaasha iyo dadka kale ee ay tahay inay ogaadaan in mas'uuliyadda/maamulka hantida ay dhammaatay.

Sii dadka taageerada bixiya macluumaadka lagala soo xiriiri karo ee hadda ay isticmaalaan adeeg bixiyayaasha, haddii macluumaadkan aan hore loogu bixin qaab kale (sida Tilmaamaha Daryeelka Caafimaadka, Oggolaanshaha Shaacinta Macluumaadka, Heshiiska Go'aan Gaarista Qofka Laga Caawinayo, iwm.).

Wixii Macluumaad Dheeraad ah

Wixii talo shaqsiyeed ah oo ku saabsan xaaladdaada, la xiriir:

Laynka Macluumaadka Mas'uulnimada
Maxkamadeed:

☎ **952-945-4174** ama **844-333-1748**

✉ **cesdm@voamn.org**

Booqo websaydkeena wixii macluumaad dheeraad ah:

🌐 **www.voamnwi.org/cesdm**
ama iskaan
mari QR koodhka

